

**GOOLAHA IYO CABIRAADA GUDIGA WAXBARASHADA**

Gudiga Waxbarashada, sida hay'ad si sharci ah loo dhisay oo ah wakiilo la soo doortay, ayaa leh mas'uuliyada dejinta siyaasada Degmada. Gudiga wuxuu u dhaqmaa si waafaqsan awooda iyo mas'uuliyada ay siiyeen sharciyada federaalka iyo gobolka, qawaaniinta, iyo xeerarka iyagoo matalaayo muwaadiniinta degmada.

Si loo hubiyo in barnaamijyadeeda waxbarashada ay siiyaan dhamaan ardayda waxbarasho tayo sare leh, Gudiga wuxuu:

1. Si dhow ula shaqeeyaa bulshada si loo hubiyo in ficilada gudiga iyo waxqabadka ay tixgeliyaan welwelka iyo rabitaanka bulshada.
2. Aqoonsadaa baahiyaasha waxbarasho iyo teknoolojiyadeed ee bulshada iyo warshadaha, si baahiyaashaas loogu bedelo barnaamijyo loogu talagalay dhiirigelinta ardayda iyo u diyaarinta xirfadahooda mustaqbalka, iyo si joogto ah loo qiimeeyo tayada iyo sinaanta Degmada.
3. Shaqaalaysiiyaa iyo qiimeeyaa Kormeeraha Guud ee Dugsiyada si waafaqsan siyaasada 0320, oo awood u leh inay hubiso in shaqaalaha dugsiga fuliyaan siyaasadaha Gudiga.
4. Bixiyaa hogaan si goosha Gudiga ay u noqdaan kuwo si hufan loo fuliyo. Ficilka gudiga waa in oo ku koobnaadaa siyaasad dejin, qorshayn, iyo qiimaynta Gudiga u wakiishay awooda Kormeeraha guud ee fulinta siyaasadaha.
5. Qiimeeyaa hormarka laga gaaray xaqiijinta hadafyada fog iyo kuwa dhaw ee Degmada iyo hubinta in siyaasadaha gudiga iyo khayraadka ay si wax ku ool ah u taageeraan aragtida Degmada.
6. Bixiyaa shaqaale ku haboon iyo fursado tababaro Gudiga.
7. Buuxiyaa mas'uuliyadaha maamulka sida uu dhigayo sharciga gobolka iyo federaalka.

Hadafka Dugsiga Degmada Magaalada Rochester iyo Bayaanka Aragtida waxa ay horseedaan goolasha Gudiga Waxbarashada iyo waxay ku qeexan yihiin siyaasada Falsafada Waxbarashada (0000). Iyadoo la tixgelinaayo in hadafyadaan ay ku kala duwanaan doonaan sanadba sanadka ka dambeeyo, goosha Gudiga waa in lagu daraa siyaasadaan ku Bandhigan 1 (2000-E1). Hadafkaan sanadlaha ah waxay wadaan Goolasha iyo Ujeedooyinka Kormeeraha Guud (3000).

Tixraacid: Falsafadda Waxbarashada (0000)  
Qiimaynta Kormeeraha Guud (0320)  
Hadafka Gudiga iyo Cabiraada (2000-E1)  
Goolasha iyo Ujeedooyinka Kormeeraha Guud (3000)

Qoraalka: La qaatay Maarso 24, 2022 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2021-22: 524; Wax la bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg

Abriil 27, 2023